

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA
SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2014

AF-SOOMAALI



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Boggan waa bogga feegaarka lama qiimayn doono waxa ku qoran.



Akhri sheekadan, dabadeedna ka warceli weydiimaha kaaga iman doona.

Beri ayaa waxaa magaalo xukumi jiray boqor, waxaana dadka magaalada deggen caado u ahayd in ay sannad kasta doortaan boqor cusub, marka uu sannadkaasi dhammaadana inta ay dhar qurux badan u xiraan, maroodina saaraan ayey magaalada ku soo wareejin jireen, iyaga oo sagootinaya, dabadeedna waxay saari jireen dooni si ay ugeeyaan jasiirad cidla ah, si uu noloshiisa oo dhan halkaas ugu qaato,waxayna dadka magaaladu dooran jireen boqor kale oo cusub.

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa badmaaxyadii saarnaa doonti boqorkii ugu damayey jasiiradda ku soo rogtay,waxay arkeen wiil dhallinyaro ah oo ka badbaaday dooni degtay,looxna ku dabaalanaya,waxayna keeneen magaaladii.

Dadkii magaaladu waxay ku tashadeen in wiilkan dhallinyarada ah loo sharaxo boqortinimada ,waxaana loo sheegay in 12 bilood kaddib loo qaadi doono jasiiraddii cidlada ahayd ee la geeyay boqorkii isaga ka horreeyay iyo kuwii kale ee ka sii horreeyayba.

Saddex cisho markii uu boqor ahaa ayuu wasiirradiisii amar ku siiyey in la geeyo jasiiradda loo tarxiili jiray boqoradii isaga ka horreeyay isagana la geyndoono markii uu xilku ka dhammaado. markii ay cagaha dhigeen isaga iyo raggii la socdey ,mise waa bahalo dad cun ah oo meel kasta ka ciyaya iyo lafihii boqoradii isaga ka horreeyey oo meel kasta daadsan, wuxuu ogaaday in markii boqor kasta la keeno ay bahalani kala goosanayeen, waxaa kale oo uu arkay in ay jasiiraddu tahay kayn jiq ah.

Dib ayuu u soo noqday ,markaas ayuu boqol nin oo shaqaale ah si hoose ugu diray si ay bahalada uga laayaan geedahana uga jaraan meelo laga degona ugu sameeyaan jasiiradda.



Bil markii ay hawshaasi socotay ayuu booqday wuxuunu arkay inay jasiiraddii noqotay meel la degi karo, haddana waxa uu shaqaalahii ku amray inay beero iyo bustaanno ka sameeyaan, isla markaana xoolaha la dhaqdo geeyaan sida lo'da, geela, ariga, digaaga iyo xayaawanada kale ee dabjoogta ah.

Bishii saddexaadna waxa uu shaqaalihii jasiiradda joogey ku amray inay guri wayn uga dhisaan isla markaana deked yar oo ay doonyuhu ku soo xirtaanna ay ka dhisaan, ilaa shan bilood markii ay shaqaalihii ka shaqaynayeen ayey jasiiraddii isku badashay meel qurux badan oo barwaaqo ah naftuna jeclaysanayso.

Markii uu sannadkii dhammaaday ayey dadkii waxay arkeen boqorkii oo iska .faraxsan

uu sannadkii dhammaaday ayey dadkii waxay arkeen boqorkii oo iska markii faraxsan, waxay ku yiraahdeen" boqorow boqorradii kaa hooreeyey markii uu xilku ka dhammaado way naxsanaan jireen ee adigu xagee farxadda ka keentay" , boqorkii dadkii ayuu shirihey dabadeedna waxa uu u sheegay in uasiiraddii bahalaha lahayd oo boqorrada loo masaafurin jiray uu ka dhigay meel barwaaqo ah, magaalada oo dhammina u guuri doonto, sidaas ayaana lagu soo afmeeray caadadii xumayd ee ka jirtay magaaladaas.



QAYBTA KOWAAD: SHEEKO

[12 DHIBCOOD]

Goobo geli jawaabta ugu saxsan

(06 dhibcood)

1. Magaalada waxaa xukumi jirey:
 - b. Wasiirro
 - t. Boqorro
 - j. Culimo
2. Dadka magaalada degani sababta ay boqorradooda cidlada u geyn jireen, xilkana uga qaadi jireen, waxay ahayd :
 - b. Xukun jacayl
 - t. Dhaqaale
 - j. Caado
3. Doonta degtey waxaa laga soo badbaadiyey:
 - b. Oday da' ah
 - t. Wiil dhallin yar
 - j. Gabar uur leh
4. Jasiiradda boqorada la geyn jirey waxaa ku noolaa:
 - b. Xoolo
 - t. Shinbiro
 - j. Bahalo
5. Boqorkii da'da yaraa saddex cisho markuu xilka hayey ayuu shiriyey:
 - b. Wasiiraddii
 - t. Macallimiintii
 - j. Ardaydii
6. Markii ugu horraysey wuxuu boqorku jasiiraddii geeyey:
 - b. Boqol lo' ah
 - t. Boqol fardo ah
 - j. Boqol shaqaale ah



Ka war celi dhamman weydiimahan soo socda

(06 dhibcood)

- 1) Maxaad ka dhigi lahayd ciwaanka sheekada?

.....

.....(02 dhibcood)

- 2) Sheeg murtida ay xanbaarsan tahay sheekadu?

.....

.....

.....(02 dhibcood)

- 3) Maxay ku kala duwanaayeen boqorradii hore ee magaaladaas xukumi jirey iyo kii ugu dambeeyey uguna da'da yaraa?

.....

.....

.....(02 dhibcood)

QAYBTA LABAAD: NAXWE

[20 DHIBCOOD]

- i. **Keen erayadan kuwo la macne ah.** **(04 dhibcood)**

1) Haan (01 dhobic)

2) Cartir (01dhobic)

3) Toorrey (01dhobic)

4) Geedo (01dhobic)

- ii. **Erayadan hoos ku qoran lidkooda ku hor qor** **(04 dhibcood)**

1) Waayeel (01 dhobic)

2) Koonfur (01 dhobic)

3) Hangool (01 dhobic)

4) Galbeed (01 dhobic)



iii. Magacyadan soo socda qodob raaci (04 dhibcood)

- 1) Wadaad (01 dhobic)
- 2) Waddo (01 dhobic)
- 3) Luubaan (01 dhobic)
- 4) Warside (01 dhobic)

iv. Dhamaystir weerahan soo socda. (04 dhibcood)

- 1) Boqorku xukunka waa jeclaa, laakiin waa laga qaaday. **Ka soo saar weedhan XIRIIRIYAHAD**.....
- 2) Wiilku wuxuu ku dabaalanayey loox weyn . **Kasoo saar weedhan FALKA**.....
- 3) Waxaa boqorrada la saari jirey maroodi aad u weyn. **Ka soo saar weedhan TILMAAMAHAD**.....
- 4) Jasiiraddu waxa ay ahayd meel aad u wanaagsan. **Ka soo saar weedhan MAGACA GUUD.**

v. Erayadan wadarta ah ka dhig keli (04 dhibcood)

- 1) Aagaamo (01 dhobic)
- 2) Ubbooyin (01 dhobic)
- 3) Abxado (01 dhobic)
- 4) Hangollo (01 dhobic)

QAYBTA SADDEXAAD: HIDDAHA IYO DHAQANKA [17 DHIBCOOD]

I. Erayadan soo socda ku buuxi meelaha ay ku habboonyihiiin (04 dhibcood)

Koor ,Aagaan, Dhito ,Gabooye, Kalax

1. Caanaha la dhigo si loo lulo waxaa layiraahdaa. {.....}
2. Sheyga qoorta loogu xiro hasha hawsha badan. {.....}
3. Weelka caanaha lagu lulo. {.....}
4. Sheyga ugaarsaduhu qalabkiisa ku ridan jirey. {.....}



1. Maxaa la yiraahdaa labada nin ee labo gabdhood oo walaalo ah kala qaba?

.....
.....

2. Maxay isu yihin labada afo ee nin wada qabo?

.....
.....

3. Maxaa layiraahdaa ninka la deggan reerka uu gabadha ka qabo?

.....
.....

4. Odayga aad gabadhiisa qabtid maxuu kuu yahay?

.....
.....

III. Isku aaddi qoraalkasta iyo macniihiisa (05 dhibcood)

- | | |
|---|----------------|
| 1. Qofka beeshiisa tixgelinta dhaqan ku leh | b) Haween |
| 2. Qof guri ka dhalatay guri kalena ku dhaqan | t) Isin |
| 3. Cudur la dagaalamayaasha | j) Macallimiin |
| 4. La dagaalamayaasha aqoon darada | x) Magan |
| 5. Dad cidda la yaal oo aan ka dhalan | kh) Takhaatiir |

QAYBTA AFRAAD: HEES HAWLEEDYO

[08 DHIBCOOD]

Hees kasta horteeda ku qor meesiga iska leh.


1. Hees idaad b) Heeryadu hubkaa weeyee ma ku haamanaya {.....}

2. Heesta awrta t) Galaalo cidaye ma gu' baa da'ay mise gurigaad gabno ku

Ku ogeyd {.....}

3. Hees lo'aad j) Sirqa salashiyo saqiir booyaba seexiyaay sagal.{.....}

4. Hees geel x) Tuurta gibinta ah oo tukaha le'eg bey tukubiyooy {.....}



QAYBTA SHANAAD : MAAHMAAHYO.

[08 DHIBCOOD]

I. Kuwan soo socda ka qor min hal maah-maah

(04 dhibcood)

- 1) Qor hal maahmaah oo ay sagaaradu leedahay.

.....
.....
.....

(01dhobic)

- 2) Qor hal maahmaah oo ay dumarku leeyahiin.

.....
.....
.....

(01 dhobic)

- 3) Qor hal maahmaah oo uu geelu leeyahay.

.....
.....
.....

(01 dhobic)

- 4) Qor hal maahmaah oo uu dabku leeyahay.

.....
.....
.....

(01dhobic)


II. Sharraax kooban ka bixi maahmaahadan soo socda

(04 dhibcood)

1. Far keliyi is ma maydho.

.....
.....
.....

(01 dhobic)



2. Qunyar socde qodaxi ma muddo.

.....
.....
.....(01 dhibic)

3. Lafo dabaal yaqaani ma shiidaan.

.....
.....
.....(01 dhibic)

4. Nin buka nin baahan baan looguma dhiibo.

.....
.....
.....(01 dhibic)

QAYBTA LIXAAD : XOO LAHA SOOMAALIDU DHAQATO. [06 DHIBCOOD]

Soomaalidu xoolaha ay dhaqato waxay u abla-ablayaan kooxo, iyagoo u eegaya astaamaha ay isku raacaan, hadaba adigoo adeegsanaya erayadan bilaha ku jira, mid walba ku buuxi meesha ku habboon.

(Ishkin , Geesley , Nugul, Gammaan)

(03 dhibcood)

- | | |
|---|---------|
| 1. Geela iyo Lo'da waxaa la isku yiraahdaa. | {.....} |
| 2. Riyahaya iyo lo'da waxaa la isku yiraahdaa. | {.....} |
| 3. Lo'da ,fardaha iyo dameeraha waxaa la isku dhehaa. | {.....} |



II. Erayadan ku buuxi meelaha bannaan

(03 dhibcood)

(Baraar, Ugeyb, Aalo)

1. Dhasha geelu markii ay nirgo dhaafaan. {.....}
2. Dhasha riyuhu markii ay waxaro dhaafaan. {.....}
3. Dhasha iduhu markii ay naylo dhaafaan. {.....}

QAYBTA TODDOBAAD: SUUGAAN

[17 DHIBCOOD]

1. Tuducyadan maansooyinka kala duwan ah, mid kasta ku hor qor qaybta uu maansada ka yahay. Sida:- **Gabay,Geeraar,Buraanbur ,Masafo** iwm. (04 dhibcood)

b. Walhadoow faraskayga weer yar aan ku ammaanay wowga maan ka bilaabo.

.....
.....(01 dhobic)

t. Sida geel harraadoo wax badan hawdka miranaayey,oo haro la soo joojiyey oo kureygu heegaayo.

.....
.....(01 dhobic)

j. Buulyareey weelka yaanu boorku gelin,oo naag xun waa lagu beloobaaye beedal noqo.

.....
.....(01dhobic)

x. Xuseenoow aqoon laawe awal hore haddaad tiri,Eebbaa Adduunka leh,eeggana maxaw tiri anigaa aryowga leh,war ma Alloo kalaa tahay mise waad ka adag tahay.

.....
.....(01dhobic)



2. Akhri gabaygaan dabadeedna ka jawaab su,aalaha kaaga iman doona.

1. Dawladahaan laga qayliyee qaaq wax kaga siiyey
2. Ninwaliba marbuu qaadan jirey qaanso iyo leebe
3. Qarfo iyo marbuu seexan jirey qalaanqal hoosteede
4. Ha yeeshi quluub wada jirtaa qani sheekhoowe
5. Qalalaase meel lagu lumiyoo qaylo iyo oohin
6. Qoraxdii dhacdaba teennu waa kala qaxaysaaye
7. Qod la ridey quraanyada gashaa qoob dad waw halise
8. Hadduu geed qalalo roobku waw qamac kaliileede
9. Dirxiga qurunku uma soo uroo waaba quudsadaye
10. Qasdi jeeray wada yeelatoo qawlka ku heshiiso
11. Qabyo weeye soomaaliyeey qiiradaadaniye
12. Qof qalbi la' quraankii uu akhriyey qaaf dheh ku harraadye
13. Kutaabtaa sidii lagu qariray qiiil la' aakhiro'e
14. Qayrkii ka hare waa ninkii qalay walaalkiise

B. Ku buuxi meelaha bannaan ereyadan bilaha ku jira kuwa ugu habboon

(03 dhibcood)

1.Ciwaanka gabaygu waa [.....] (1 dhobic)

{ Midnimo ,Xumaanta qabyaaladda , Guubaabo dagaal}

2. Abwaan Tima-cadde waxa uu soomaalida ku guubaabinayaa iney :

[.....] (1dhobic)

{Midoobaan , Qabyaaladda ka dheeraadaan , is qadariyaan }

3.Abwaanku "Quluub wada jirta" wuxuu ula jeedey:[.....] (1 dhobic)

{ Xornimo , Midnimo , Madadaalis}



T. Ka warceli weydiimahan gabayga ka yimid **(10 dhibcood)**

1. Ujeeddada gabayga haddii aan eegno maxaa horay loogu mari karaa?

.....
.....
.....
.....

.....(2 dhibcood)

2. Abwaanku soomaalidii markaa joogtey muxuu ku canaantay?

.....
.....
.....
.....

.....(2 dhibcood)

3. Adigu Soomaalida maanta joogta maxaad ku canaanah lahayd?

.....
.....
.....
.....

.....(2 dhibcood)

4. Gabyaagu muxuu u ekaysiiyey qofka qabyaaladda jecel?

.....
.....
.....
.....

.....(2 dhibcood)

5. Gabyaagu wuxuu si duurxul ah u tilmaamay in uu Soomaalida waanadeeda ku daaley,Qor tuduca arrintaas tilmaamaya.

.....
.....
.....

.....(2 dhibcood)



QAYBTA SIDDEEDAAD: CURIS

[12 DHIBCOOD]

Saddexdan Ciwaan ee soo socda mid kood qaado, kana qor Curis aan ka yarayn hal bog.

1. Dhirta iyo waxtarkeeda.
2. Qabyaalada iyo waxyeeladeeda.
3. Deriska iyo xaqdhawrkiisa.

